# Golaha Wakiilada JSL

## Waaxda Hadal Qoraalka

**Opened: - 10:08 AM** **Hansard No.20/7** **Kal-fadhi 20aad fadhiigsa 31-32aad**

***16-17/02/2013***

***Dooda Xeerka Maamuuska M/weynaha iyo M/weyne ku xigeenka hore oo ka qeyb-qaaten 20 mudane socoteyna 2 cisho oo kaliya***

1. **Md. Ibraahim Mahdi Buubaa:-** Marka hore waad salaaman tihiin, waxaan qabaa anigu inaan labada Xeer ee Maamuuska Madaxweynaha iyo M/weyne ku xigeenka iyo Xeerka Maamuuska Golayaasha Sharci-dejinta ay yihiin laba xeer aan is-khuseyn, hore wuxuu xeerkani ugu soconwaayay markii Golaha Wakiiladu ku lifaaqey Xeerkii Maamuuska Golayaasha Sharci dejinta oo u dhintey dartii, maanta waxaan filayaa hadii la isku lifaaqo inaanu soconeyn.

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- ***In Xeerka Maamuuska Golayaasha sharci-dejinta Gaar loo sameeyo oo aan lagu darin Xeerkan Maamuuska Madaxweynaha iyo M/wayne ku-xigeenka,*** waa xeer jirey oo Guddida Joogtadaa Gacanta ku haysey iyada ha la weydiiyo oo Xeer Gaar ayuu ahaa oo Golaha waxaa lagaga doodey mudo ilaa 2 sano ka soo wareegtey.
- ***In Xeerkan Maamuuska Madaxweynaha iyo M/wayne ku-xigeenka sidiisa lagu ansixiyo***, waayo waa xeer muhiima, maaha madaxweyne kasta markuu xilku ka dhamaado inuu suuqa iska dhex socdo, ixtiraam buu yeelanayaa, ilaaluu yeelanayaa, Guno ayuu yeelanayaa.

Markaa, waxaan aaminsanahay in wixii Xeerka ku qoran ay yihiin wax loo baahan yahay, hadii la leeyahay ma qaadi karno waa in la khafiifiyaa, waxaa jirtey iney Guurtida Guno la qaadan jireen, markaa taana waa inaaney iman in laba mushahar la qaato oo waa in Gunada hore ee ay Guurtida la qaadan jireen la joojiyaa, Waad mahadsantihiin.

2. **Md. Xaashi Xusen Caabi:-** horta Xeerkan Maamuuska Madaxweynaha iyo M/weyne ku-xigeenku waa talaabo hor oo umada reer Somaliland hore u qaadey, waayo waxaynu maanta tabnay ixtiraam iyo qadarin madaxda qaranka in la siiyo, sharafta ay umada ku lahaayeen wax u dhigmana helaan, horta taas waan bogaadinayaa, ixtiraamka la is ixtraamo waxay ka bilaabantaa taariikhda qofka sumcadiisa.

- ✓ Magaca Xeerka waxaa loogu yeedhaa baa ku qoran Xeerka Xuquuqda Madaxweynaha iyo M/weyne ku-xigeenka hore, anigu halkaa waxaan odhan lahaa yaan la cayimin oo ku maanta nool hadii hore la yidhaahdo ku jirimayaan.
- ✓ Markaa waxaan soo jeedinayaa in la yidhaahdo, "***Xeerka Xuquuqda Maxaweynayaasha iyo M/weynaada xilku ka dhamaadey*"**.
- ✓ Halka dhowrsanaanta, ee ilaalada sharci ee xeerku siiyay Cid xadidan buu xeerku yidhi, Markaa waa inaan ka dhignaa "**Cid Tilmaaman"** halka Cid xadidan ku qoran tahay.
- ✓ Xuquuqda hoyga waxaan odhan lahaa, 18 jir ilmaha ugu horeya gaado hoyga way ku jirayaan waayo waa inaan cimri ku xadidnaa.
- ✓ Halka Gunadooda, horta caadiyan waxay galaan Guurtida oo Gunada la qaataan, laba mushaharna in la qaado ma banaana, markaa Taas ha loo daayo, ama inta mid cusub loo sameeyo oo tan Guurtida ay la qaatana laga jaraa,
- ✓ Tan Golayaasha Sharci-dejinta, anigu waxaan qabaa ineynaan mar walba cid daba dhigin xuquuqda Golayaasha oo waa inaynu ka madax banaanano, oo Xeerkenu sida la sheegayay inkastoo anigoo Gudidda joogtada ka mida aanan arag marna, markaa waa inaan Xeerka la keeno, Xeerkana uu sidiisaa u madaxbanaanado oo wixii aynu ku dareyno ku darno.

3. **Md. Xamze Maxamed Gaadaweyne:-** Horta anigu Md. Xashi siduu u dhigey hadalka, waxa weeye yaanu hadal qoraalku ina seegin, labadii Madaxweyne ee hore way dhinteen, labadii Madaxweyne ku-

xigeen ee horena mid baa dalacey oo noqdey Madaxweyne, markaa iminka waxa nool waxa weeye, Md. C/raxman Aw Cali iyo Xasan Ciise.

***Tan Xildhibaanada Labada Gole iyadu way ka madaxbanaan tahay Xeerkan***, markaa ha laga daayo in lagu lifaaqo oo gooni ha laga dhigo, anigu gudidda joogtadan ka mid ahay oo waligey maan arag xeerka iyo meel lagu hayo, mala wuu soo socdaayo kaana ha lagu dhakhsado.

***Tan kale, qofku laba mushahar ma wada qaadan karo***, waa in meel kaliya uu ka qaato wuxuu qaadanayo, markaa taana ha la habeeyo oo ha laga dhigo inuu meel kaliya ka qaato wuxuu helayo, intaas ayaan kaga baxayaa waad mahadsantihiin.

4. **Md. Faarax Maxamuud Cabdule:-** Xeerkan waxaan soo jeedinayaa in loogu yeedho ***Xeerka Xuquuqda Madaxweynaha, M/weyne ku xigeenka iyo baarlamaanka*** Xilkoodu dhamaadey.

anigu sidii Mudanayaashii iga horeeyay sheegen ma qabo in Xeerkan laga dhigo Xeerka Madaxweynayaasha iyo Ku-xigeenada, Barlamaankuna yeesho Xeer gaara, waxaan aaminsanahay in la isku daro waxaana ku sababeynaya, Markii Mushaharka la sameynayay Madaxweynaha, M/weyne ku-xigeenka iyo Barlamaanka ayaa Israacsanaa waana dastuuri, oo dastuurka ayaa tilmaamey.

Waxaan kale oo aan soo jeedinayaa, Xeerkasta oo inagaga yimaada Madaxweynaha ama Golaha Xukuumada waa inuu calaamadii lahaadaa Golaha uu ka yimi, sida aynu inaba u shaanbadeyno waa inuu Shaambadii Madaweynaha lahaado si loo ogaado warqadaasi iney ka timi Golihii Wasiirada Xukuumada.

**Qodobka 4aad F/1aad** oo odhaneysa "*In Dawaladdu siiso hoy ku habboon oo ah guri dawladeed oo ah (free rent) inta ay nool yihiin/Xaasaskoodu nool yihiin, ka u yar caruurtooduna ka*

*gaadhayaan da'da qaangaadhka"* anigu halkaa Qaangaadhka ayaan ka saarey oo waxaan idhi "inta ***caruurtooda ay noolyiniin"*** waxa weeye Maamuuskii wuu yaalaa, markaa hadii uu dalka ka tago, waayo waxay ka tagi karaan dad waayeela oo aan shaqeysan Karin.

Isla Qodobkan **F/3[aad]** oo ah "in la siiyo hal gaadhi, Dareewal, shaqaale iyo ilaalada nabadgalyada" taas anigu waxaan qabaa mar hadii la damaanad qaadey noloshoodii oo wadan yar beynu nahay wayna ka dabari karaan inta la siiyay, xeerkana wax waa laga badali karaa markuu dhaqaaluhu inoo saamaxo, markaa anigu waxaan ka saaray Dareewal, shaqaale iyo Gaadhiga, oo waxaan u deyn lahaa "ilaalada Nabadgalyada" oo kaliya.

**Qodobka 5[aad] F/1[aad]** oo odhaneysa *"Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku-xigeenka hore waxay yeelanayaan 25% mushaharka ku xusan Xeerka Mushaharka Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku-xigeenka iyo xuquuqda ay ku helaan xubin sharafeednimada Golaha Guurtida".* Halkan hadaan la cadeyn oo waxay qaadanayaan aan la sheegin, qofkuna laba mushahar ma wada qaadan karo, markaa waa in la yidhaahdaa "***Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku-xigeenka hore waxay leeyihiin Guno u dhiganta"*** **ayaan soo jeedinayaa.**

Qodobkasta oo halkaa ku jira **waa in laga saaro** "*Caruurtiisu inta qaangaadhayaan*", Meelkasta oo waxay qaadanayaana lagu sheegayo waa in iyana laga dhigaa "**Guno u dhiganta"** oo aan mushahar laga dhigin.

**Isla Qodobkaas F/4[aad] waxaan soo jeedinayaa in laga saaro**, waxaa ku qoran "*Xuquuqda kor ku xusan waxay madaxweynaha iyo Mweyne ku-xigeenku ku waayi karaan haddii uu dalka ka qabto xil siyasadeed (Golaysha Qaranka, Xisbiyada Qaranka iyo Ururada siyaasadeed"* markaa waxaan leeyahay waa in lagu daayo Golayaasha Qaranka, waayo dee Xisbiyada mushahar kama qaato, taasna waa in Xeerka laga saaro.

**Qodobka 7aad** oo ah Reebanaanta, waxaan ku darey anigu **F/2aad** oo odhaneysa "Maxkamadi ku xukunto, Xukun kama danbeysa oo saddex sano iyo wixii ka badan ah" waayo taasna wuuu ku waayi karaa Xuquuqdii, markaa farqadaana waa in lagu daraa.

Halka barlmaanka ee aan kaga daray Xeerka iyadana waa inaan qodob kale oo noqonaya qodobka xeer-dejinta ugu darnaa, kaas oo noqonaya "***Xubin kasta oo ka mida barlamaanka Somaliland (Golaha Guurtida iyo Golaha Wakiilada) ee mudo xileedkoodu dhamaadey waxay leeyihiin Guno loo cayimo"***.

runtii halkaa anigu mushahar ama Guno joogto ah maan cayimin, lakin waxaan odhan lahaa ***waa in Matalan loo cayimaa bil mushaharkeed inta sano ee ay xilka hayeen***, oo waa in halkaa laga soo galiyo, waayo barlamaaku wuu badan yahay oo qofkasta inuu guri helo way adkaaneysaa, wax kale laguma taxi karo, sida madaxweynaha aan guri iyo gaadhi uga dhigney.

5. **Md. Siciid Cartan Cisman:-** Shir-gudoonka iyo Golaha waad salaaman tihiin, anigu qabaa sidii xildhibaankii iga horeeyay yidh ineynu is-raacino Maamuuska M/weynaha iyo M/weyne ku-xigeenka iyo Maamuuska Golayaasha Sharci-dejinta, sababtu waxa weeye ma aaminsani iney culeys ku keenayo ama dhibaato sida raga qaar leeyihiin, waxaaney ku haboontahay in la israaciyo labada Xeer.

Dalal baa inaga jaara oo xeerar sameysta, Xeerkeenan iminka 2 bilood ka hor Xeer la mida Xeerkan Maamuuska Madaxweynaha, ku-xigeenka iyo Golayaasha Barlamaanka ayay barlamaanka keynta ansixiyeen oo ahaa xeer ka hadlaya marka qofka xildhibaanka baarlamaanka ahi ka tago shaqada $1000 la siiyo, inagu waynu arkeynaa oo dalkeenu ma qaadi karo imkaaniyaad intaa le'eg.

hase yeeshee waxaan qabaa in Guddi loo saaro oo qofka barlamaanka marka uu meesha ka tago sanad markuu meesha ka tago in wax macquula loo sameyo, iminka mudanayaal halkan ka tagey ayaa suuqa qaad ku iibiya taasi waxay meel ka dhac ku tahay Qaranka, qaarna xamar iyo meelo kale ayay galeen, markaa sidaa aan Madaxweynaha iyo

ku-xigeenka sharaftooda u dooneyno in qofka xildhibaanka ah iyagana loo doono.

Halkan waxaa ku qoran Madaxweynaha iyo M/weyne ku-xigeenka iney 25% mushaharkooda in looga dhigo xuquuq, dee horta iney badan tahay iyo iney yartahay ileyn war uma hayno, markaa waa iney Xeerka ku cadaato intuu qaato iyo waxay 25%kaasi udhigmaan, oo lagu cadeeyo Xeerka tirada ay tahay, markaas ayaan la odhan karaa waa munaasib iyo maaha.

Qofna laba mushahar xaq umalaha, Mushahar bay ka qaataan Madaxweynaha iyo M/weyne ku xigeenku Golaha Guurtida ka qaataan, tan ha loo sameyo ayuu Xeerku leeyahay, laba mushahar ma qaadan karaan waa iney mid uun ku e-kaadaan.

**Sidaa darteed waxaana qabaa:-**

- Inaynu israacino Xeerkan, sidaa dawladah jaarka aynu nahay isu-raaciyeen inaynu oo wax macquula loo sameeyo.

6. **Md. Maxamed Xuseen X. Ciise:-** Lacag dhan ilaa 12 kun oo dollar ayay u qoreen oo ilaa inta uu nool yahay ay u qoreen, lakiin mudanaha marka mudanaha xilku ka dhamaado ilaa 100 kun oo dollar ayay u qoreen waana cudur dhaqaale oo jira lakiin mudanaha ayay qiimaynayaan waayo waa mudane la soo doortay oo qiimo ku leh dadkii soo doortay waana in uu suuqa ku soo dhicin ee waa in uu qaranku qaadi karaa, anuu markaa waxaan odhan lahaa anoo xildhibaanada lamid ah waxaan odhan lahaa marka laga halaayo gunada iyo maamuusta Madaxweynaha iyo M/xigeenka.

**Qodobka 5aad** oo kale in lagu daro farqad odhanaysa mudana kasta oo baarlamaan oo xilku ka dhamaado waxaa la siinayaa boqolkiiba intaa Matalan mushaharkiisa baoqolkiiba intaa tusaale ahaan 25% mushaharkiisa oo bilwalba ah oo u dhiganta inta uu soo shaqeeyay.

**Qodobka 5aad/f/3aad oo dhanaysa sidan:-** *Haddii marwada/marwooyinka madaxweynaha ama madax wayne ku xigeenka waxaa caruurta loo sii wadayaa 12.5% mushaharka ku xusan madaxweynaha iyo madax weyne*

*ku xigeenka ilaa inta ilmaha ugu yari ka gaadhayo da,da qaangaadhka* waxaan odhan lahaa in farqadaa lagu noqdo oo la saxo waayo wax baa ka dhiman Madaxweynuhu waxa uu leeyahay wax la yidhaan sagootin tayo markaa Xeerkan waan la akhriyaa Xeerkii Madaxweynayaasha iyo Golayaasha Qaranka oo mudanahana loogu daraa xaqa sagootinta waanad mahadsan tihiin

**Gudoomiyaha: -** Mudanayaal waxay xildhibaano badani soo jeediyeen in xeerkan lagu daro mudanayaasha, waxaan rabaa in ay cadeeyaan waxa ay doonayaan in loogu daro.

7. **Md. Siciid Cilmi Rooble:-** Gudoomiye mid waa secondment garaynayaa waxaa weeyi xeerkii Madaxweynaha markaan samaynaynay iyo Distoorka ku taalaba waxaa weeyi xeeka Madaxweynaha iyo M/Weyne ku xigeenka iyo Golayaasha Baarlamaanka sidaa ayay u qornayd , kana waxaa uu noqonayaa Xeerka Maamuuska iyo muunaynta Madaxweynaha ku xigeenka iyo Golayaasha Baarlamaanka.

   Si ay wuxu inoogu noqdaan nidaam sharciya waayo Madaxweynuhu inaga inooma samayn karo ee tiisa ayuu soo samaystoo uu inoo soo gudbiyay oo inagaa dadka mushaharka u samayna oo isgu (limit)kiisii ayuu soo sameeyay oo inagaa xaq u leh xuduudii kale oo la inaga rabaa, isagu waxaa uu ilaaliyay Xeerka balse inagamuu tagin oo maahan macnaheedu anigaa soo samaystay kaligay ee waxaa uu ilaa shadday xuquuqda uu lahaa ee dastuuriga ah.

   **Anigu Waxaan Soo Jeedinlahaa:-**

   - hadii taa la isla qaato Gudi Hubaysan oo ku meel gaadh ah u saar hana soo habeeyaan kal-fadhigu markuu bilaabmana ha keenaan wixii oo tafaqyo tiran ha keenaan taas ayaan odhan lahaa anuu taas ayaana ina baajinaysa wixii kale oo dhan waan mahadsantihiin

8. **Md. C/raxman Muuse Jaamac:-** Gudoomiye hadalku waa iska dhan yahay, anigu waxaan taageersanahay soo jeedinta **Siciid Cilmi rooble** oo ah guddi loo saaro si loo habeeyo xeerka.

Xeerka Waa in la yidhaado oo lagu daraa Xeerka Madaxweynayaasha M/weyne ku-xigeenay iyo Mudanayaasha xilka ka dega, waana in la soo habeeyo oo si wanaagsan loo soo habeeyaa waayo ma habaysna xeerku waana in loo saaraa Guddi.

9. **Md. Cali Maxamed Aadan:-** bacda salaam, Gudoomiye waxaan soo jeedintii horaba lahaa in Xeerkan loo bixiyo Xeerka hab maamuuska Madaxweynaha M/weyne ku xigeenka iyo Mudanayaasha labada Gole ee xilka ka daga, waana in laga saaro kalmada *Hore* oo la isku daro sharciyana sidaa ayay u eegtahay.

***Mudane Gudoomiye***, arintani waa arin xisaab u baahan qodabka ay xildhibaano badani ka sanqadhiyeen ee odhanaya qofku laba mushahar ma wada qaadan karo, Dastuurka waxay ugu taalaa qofku laba shaqo ma wada waban karo oo dawladeed, markaa waxan aan ka hadlaynaa maaha shaqo oo uu qabanayo ee waxaan ka hadlaynaa waa maamuus tan hore ee ay ka qaataan guurtiduna waa xubin sharaf tan aan hada wadnaana waa Maamuus labadana waa ay wadan karaan ayaan qabaa sharciyan taasi waa mid.

Tan labaad, hadii uu qofku qabto xil Xisbi ama Urur maamuuskii waa uu waayayaa waan in Qodobkaana meesha laga saaraa, marka aan leenahay qaab ayay xukumadau u soo jeedisay ee ay leedahay Madaxweynaha iyo M/weyne ku-xigeenka waxaa la siinayaa staff, Gaadhi iyo Guri xaq bay u leeyihiin in la siiyo waana in la isugu daro oo maahan in laga kala reebo.

Xildhibaanada labada Gole ee xilka ka daga waxay yeelanaysaa tafaasiil waxna waa la kala dooranayaa in si fiican looga barraan dago mar hadaan isla garanay in la isku daro oo xildhibaano badani isu raaceen, mar hadii la isku darayana waa in qiyaas la sameeyaa, ma sida Madaxweynahay iyo ku xigeenka ayaa xuquuq soconaysa la siinayaa, mise waxaa la siinayaa mar kaliya si aanu hadhaw isaga oo caga cad oo dacas wata aanu suuqa u maro oo sharaftii Somaliland halkaa ku xumaan oo waxaa la siinayaa wax buuran, Dhul ma la siinayaa, ma lacag kaliyaa la siinayaa, Guri ma la siinayaa ma xaquuq soconaysaa la siinayaa waxay gudoomiye u baahan tahay in qodobo loo kala doorto,

waxaa kale oo ay u baahan tahay qaabka la isugu darayo oo halka ay iska raacayaan waxna waxa ay iska raacayaan sida aan ciwaanka ku sheegnay qaarna waxa ay iska raacayaan dhanka hoose Qodobada Xeerka.

Markaa qodobana gaar ayaa loo tilmaamayaa isku darka labada xeer hada waxaan hayaa draft oo ah kii xildhibaanku sheegayay oo ay xildhibaano soo diyaariyeen ayaan haynaa, marka labada la isku darayo waxay u baahan tahay farsamo.

***Sidaa darteed soo jeedinayaa:-***

- *Waxaan raacsanahay soo jeedintii Siciid Cilmi Rooble ee ahayn in Guddi ku meel gaadh ah loo saaro, oo aynaan halkan ku xiiqin ee ay soo farsameeyaan gudidaasi dhanka kale awood ma u leenahay in aan wax ka badalno sida ay xukuumadu usoo gudbisay markaa in aan waxna ka saarno waxna ku darnaa waa awooda Golaha markaa waxaan ku waafaqay in gudi ku meel gaadh ah loo sameeyo ayaan ku raacay waad mahad san tihiin.*

**Gudoomiyada: -** xildhibaan ku waa mahad san yahay markay doodu dhamaato ayaynu u saari donaa gudi isu soo hagaajisa

10. **Md. Axmed Ducale Bulaale: -** Sida Mudanayaal horaba ka dhawaajiyeen waxaan qabaa ama soo jeedintaydu tahay, in xeerka Madaxweynaha iyo Golayaasha sharci dajinta hal xeer la isga dhigo sidii aan xeerkii musha harooyinkaba hal xeer aan uga wada dhignay taas waan soo jeedinaya.

Talabaad qodobada qaar sheegaya xaquuqda da'da waan ka saari lahaa meesha waayo shaqaale maahan, waxaan ka hadlaynaana maahan hawl gab ee waa maamuus iyo xaquuqda Golayaasha sharci dajinta way farabadan yihiin, mana qabo in la xamilayo in loo sameeyo guno joogto ah.

**Markaa Aniguna Waxaan Soo Jeedinayaa:-**

- In guddi ku meel gaadh ah in loo saaro wixii fikir ahna aan ku darno khibradaha ay u baahan yihiina doonta intaa ayaan anigu soo jeedinayaa waanad mahadsantihiin dhamaantiin.

11. **Md. Mahdi C/laahi: -** waxaan salaamayaa Shirgudoonka Mudanayaasha iyo Saxaafada, anigu rayi ahaan waxaan qabaa xeerkan Maamuuska Madaxweynaha iyo M/ku xigeenka iyo Golayaasha sharci dajinta in la is kaga dhigo hal xeer sababtoo ah Madaxweynaha iyo ku xigeenku xaquuda ay leeyihiin Xildhibaanaduna in la ilaaliyo ayaa loo baahan yahay.

12. **Md. Ibraahim Axmed Haybe: -** waxaan idinku salaamayaa salaanta Islaamka. intaa ka bacdi. Xeerkan ay xukuumadu inoo soo gudbisay ee ka hadlaya in Guno loo sameeyo Madaxweynaha iyo M/weyne ku-xigeenka waxaan u arkaa in ay tahay arrin sharafeed oo meesha ku jirta oo dadka madaxda inoo ah in aan aragno iyaga oo quruxbadan, oo dadkuna aanay arag iyaga oo suuqa ku dayacan, sidaa awygeed soo jeedintaana waan ayid sanahay.

    Waxaad moodaa in halkan la isku khaldayo oo aan maqlaayay in uu ka hadlayay xildhibaan, Mushahar lagama hadlaayo waayo way leeyihiin mushahar oo waxay leeyihiin mushaharka Guurtidu qaadato waxaana daruuri loo arkay in baahidoodu ka badantahay intaa, sidaa awgeed ayaa guno ahaan loogu soo (propose) gareeyay, qofkuna guno iyo mushahar waa uu qaadan karaa. Sidaa awgeed waan ku raacsanahay in aan gudbino.

    **Sida ay xildhibaano badani shegeen waxaan soo jeedinayaa:-**

    - in xeerla magiciisa aan u bixino ***Xeerka Maamuuska Madaxweynaha iyo M/ku xigeenka iyo Golayaasha sharci dajinta*** oo ay lamaane ahaadaan, oo labadaa sharci mar inaga wada baxaan, waxaana leeyahay sida Siciid Cilmi sheegay in Guddi loo saaro oo labada xeer la soo lafaguro, waad mahadsantihiin.
    -

13. **Md. Cabdi Maxamed Jaamac:-** intii badneyd waa laga Hadley, anigu dhowr qodob waan is kortaagayaa"-

    - Qodobka qaangaadhka waa in laga dhigaa inta uu ka ko korayo.
    - **Qodobka 4aad F/3aad** waa inuu noqdaa specific waxa la siinayo ee Xuquuqa oo inta laga sii cadeeyaa.
    - **Qodobk 5aad F/4aad** ee ka hadlaya Xilalka hadii uu qabto uu ku waayayo, waa qeyru dastuuri sida loo qorey, Markaa waxaan leeyahay halaga dhigo " Hadii uu noqdo Wasiir ama Xildhibaan" waayo xuquuqdiisa Siyaasadeed ee Xisbiga wuu u madaxbanaan yahay.

14. **Md. Axmed Yasiin Sh. Ayaanle:-** Xeerkan Maamuuska Madaxweynaha iyo M/weyne ku-xigeenka horta muhiimada uu dalka u leeyahay waxa weeye in kaabo nidaamkeenii dimuqraadiya, oo xilka cida qabata kursigan ay ku dhagayaan uu xeerkani u kafaale qaadayo noloshiisii inaaney dayacmin, Mana haboona Maamuus ahaan inuu meelaha ku busaaradsado qofkii Madaxweyne noqdey, markaa muhiimadaas ayuu xeerku leeyahay.

Midna waan soo jeedinayaa waxa weeye, Maxamed X Ibrahim Cigal ayaa Golayaashii inaga horeeyay keenay Xeerkan, wuxuu u suurta galiwaayay Pension Mudanayaasha Golayaasha ayay daba dhigeen oo aan suurtagal ahayn, markaa mid waan ka digayaa si xeerkani meel-mar u noqdo Caqligal maaha 164 xildhibaan oo 5tii sano mar la soo dooranayo iney qarankan xuquuq joogta ku yeeshaan mana qaadi karno.

Markaa aniga ilama haboono in xeerkan lagu lifaaqo mudanayaashu markey xilka ka tagaan, wuxuuna ku meel marayaa Xeerkani marka sida iminka loo soo gudbiyay ku soo gudbisey lagu ansixiyo,

Xeerkan aan ku darno in ninka Madaxweyne amd Ku-xigeen soo marey uu waayi karo Xuquuqda Xeerkani siinayo inu waayo karo haduu galo danbi Maxkamad horteed ka cadaatey, Qaranka iyo umadana ma wada qamato in ninkii nolashii la kafaalo qaadey waa inaanu u badheedhin inuu umada boobo, Musuqmaasuqna aanu galin, markaa hadii ay ku cadaato oo musuqmaasuq lagu soo eedeyo Xuquuqdan waanu waayo, aad bay muhiim u tahay in qodobkaa lagu daro.

**Qodobka 5aad/4aad** waxay ka soo horjeedaa dastuurka dastruurka farqadaasi, waayo Dastuurku wuxuu leeyahay qofka qabta xilka Madaxweyne ama ku-xigeen Guurtiduu ka mid noqonayaa oo xubin sharafeed buu siiyay, Guurtiduna waa Golayaasha Qaranka, marka la leeyahay inaanu ka mid noqon Golayaasha qaranka waa mid dastuurka ka soo horjeeda, markaa Farqadaa Gabi ahaanba waa in laga saaro Xeerka.

Tan Caruurta ***waxaa loo raacayaa da'da qaangaadhka shuruucda dalka,*** 12.5%ka waxba ka dhimi maayo.

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- In Xeerka degdeg loo ansixiyo oo aanu lagu Lifaaqin Mudanayaasha barlamaanka oo aan la daba galin.

15. **Md. C/raxman Yuusuf Cartan:-** Xeerku Maamuus ka hadli maaye wuxuu ka hadlayaa qeybta Mushahar siin Xubnihii soo qabta Xilalka Madaxweynaha iyo M/weyne ku xigeenka marka xilka ka degaan, isla markaana waxaa ku qoran xeerka in markey Xilka ka degaan ay ka mid noqonayaa oo ay mushahar iyo maamuus kala mid noqonayaan Golaha Guurtida.

**Qodobka 3aad** waxaa ku qoran *"Madaxweynaha iyo Madax wayne ku xigeenka hore waxay leeyihiin dhawrsanan sharci ee ay leeyihin xildhibaanada Golaha Wakiilada"* ma hayno aragna dhawrsanaan sharci oo ay leeyihiin Xildhibaanada Golaha Wakiiladu, Xeer aynu ansixiney oo Golaha Wakiiladu leeyihiina ma jiro, markaa waxaan jirin buu halkaa tixraacayaa xeerku .

Aniga waxay ila tahay inaan la isku xidhin sharcigan lagu maamuusayo Madaxda hore ee Madaxweynaha iyo k-xigeenka iyo mid mudanayaasha Golayasha sharci-dejinta ah, waa in Xeerkan Gaarkiisa loo ansixiyo loona lafa-guro inagoo ka saareyna wixii qodaxa ah, Golayaasha Sharci-dejintuna iyagaa xeerarka sameeya oo hadii ay xeer loo sameynayo iney gaarkiisa loo ansixiyo weeye. ***Markaa waxaan codsanayaa in laga joojiyo iney Xeerkan iyo xeerka dhowrsanaanta Golayasha barlamaanka la isku xidho.***

Xeerka dhowrsanaanta barlamaanka waa in si gaara loo sameeyo oo si macqula loo soo eego.

Hadii Madaxweynaha iyo ku-xigeenku markey xilka ka degaan xuquuqaha ay helayaan waxay ila tahay iney ka mid noqoto Guri la siiyo ama la iibiyo, gaadiid iyo ciidan ilaaliya nabadgalyadooda, laakiinse hadii aaney shaqo markaa qabaneyn oo ay fadhiyaan Guurtidii oo ay mushahar ku leeyihiin waxay ila tahay in Guno loo qoro in laga daayo.

**Markaa waxaan soo jeedinayaa:-**

- Xeerka qaboyo badan baa ka muuqata waa in xuquuqdooda loo daayo in la siiyo Guri, Gaadhi iyo Ciidanka ilaalada nabadgalyada, oo gunooyinka laga reebo maadaama ay Golihii Guurtida ka mid yihiin oo ay Mushahar iyo Gunoba la qaataan.

16. **Md. Siciid Maxamed Cilmi:-** shirgudoonka iyo xildhibaanada waan salaamaya, hadaad doodeyda bilaabo qodob waxaan ku raacsanahey Md. Cartan oo ah inaan Xeerka magaca ku qoran iyo wuxuu ka hadlayaa aaney is lahayn, Xeerka waxaa ku qoran inuu yahay Xeerka Maamuuska Madaxweynaha iyo M/weyne ku-xigeenka hore, wuxuuna si gaara uga hadlayaa Guno.

    Markaa waxaan qabaa in xeerka laga dhigo sida Magaciisu yahay oo aan lagu soo koobin Guno kaliye oo ah in Maamuuska markey xilka ka degaan ay yeelanayaan iyo qaabka loo sharfayo laga dhigo, habka loo sharfayo meel kaliyaa lagu xusey oo ah marka uu dhino aas qaran ayaa loo sameynayaa, laakiin inta uu noolyahay waa in loo sameeyo Guri, Gaadhi iyo Guno iyo wuxuu yeelanayo.

    - Si Golayaasha iyo meelaha la isugu yimaado sharaf u yeesho, si loo qiimeeyo meel kasta oo uu marayo waxaan qabaa inaan Xeerka lagu soo koobin Guno sida xeerka ku qoran, balse magaciisa sidii tilmaamayo iyadoo loo sameeyo Maamuus dhameystiran oo ka balaadhan Guno oo kaliya.
    - **Qodobka 5aad/4aad** waxaan ku raacsanahay Md. Axmedyasin, waxay muujineysaa xuquuq dastuuriya in halkaa laga qaadey, waxaan qabaa ku biirista ama ka mid noqoshada Xisbiyada qaranka ku biiraan ay taha Xuquuq dastuuriya oo aan laga qaadi Karin.

    **Waxaan soo jeedinayaa:-**

    - In la ansixiyo marka labadaa xubnood ee aan soo sheegay wax laga badalo.

17. **Md. Maxamed Cumar Aadan:-** waad salaamantihiin, wax badan ku darsan maayo qodobadii aan ka hadli lahaa waa laga Hadley, inta yar aan ku dari lahaa waxa weeye:-

- Golayaasha Sharci-dejinta iyo Madaxweynaha iyo ku-xigeenka si marka loo eego way siman yihiin oo shacabkaa soo doortey labadaba, markaa sharciyo badan in la sameyo looma baahnee, sharcigan halaga dhigo mid balaadhan oo kooba Madaxweynaha, M/weyne ku-xigeenka iyo Golayaasha sharci dejinta, Gudina ha loo saaro soo eegta Xeerka soo eegta.
- Mushaharka, Guryaha iyo xuquuqda wey ku kala duwanaan karaan, oo wey badan yihiin Golayaashu, markaa lama odhan karo ha la siiyo Guryo dhamaantood, laakiin Musharka waa in loo sameyo wuxuun.
- Tan xisibiyada madaama aanu mushar ka qaadaneyn oo qofku iskii ugu biiri karo ugana tagi karo, uma arko in lagu soo daro waxyaabuhuu xuquuqda ku waayayo, waana loo baahan yahay iney khibradooda ku biiriyaan Xisbiyada oo dhisaan si waxyaabihii soo marey khibrad ahaan kala taliyaan, intaas ayaan ku dari lahaa.

18. **Md. Farxaan Maxamed Cali: -** Horta marka hore waxaan odhan lahaa Madaxweynaha iyo M/weyne ku xigeenku waxay huwanyihiin sharaf iyo maamuus, markaa in la daryeelo oo la dhawro noloshood iyo Amaankooda way mudan yihiin, taasi waa wax yaabahay xaq u leeyihiin, waxyaabaha afrikanu Kursiga isugu dhajiyaana wuxuu ka baqayaa inuu dayacmayo, markaa hadii loo balan qaado in la daryeelo waa mid loo baahan yahay.

    Tan kale, halka odhaneysa wuxuu helayaa dhowrsanaanta sharci ee Golaha Wakiilada oo kale, taa looma baahna ayaan qabaa waayo Dastuurku wuxuu sheegaya in marka ay xilka ka degaan toos ugu biirayaan Golaha Guurtida oo isagaaba xildhibaana.

    **Qodobka 5aad F/1aad** waxaa ku qoran, "wuxu helayaa xuquuqda ay ku heleen Xubin sharafeedka Golaha Guurtida" marka taasi waxay ka hor-imaneysaa **Qodobka 4aad** oo odhanaya xil siyaasadeedka Golayasha qaranka iyo dastuurka, waayo qofku wuxuu ku biirayaa Guurtida lamana odhan karo Golayaasha ayuu ku biirayaa, waana retire oo xisbiyadu waxay ka faa'iideysanayaan khibradiisa oo wey u baahan yihiin oo xaq bey u leeyihiin cidii ka faa'ideysaneysa.

Magaca Xeerka, waxaan halka Maamuuska ku badlayaa “Xeerka Gunooyinka Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku-xigeenka in laga dhigo, waayo Maamuuska Dastuurka u balan qaadey.

Arrinta in Xildhibaanada lagu daro Xeerkan, waxa la sheegey in hore Xiligii ina Cigaal uu ugu socon waayay Xeerku markii lagu darey arrinkan darteed, ***markaa waxaan leeyahayh waa inaan lagu darin Mudanayaasha Xeerka***, waxaa laga yaabaa iney carqaladeyso.

In Mudanayaasha iyagu waxay u baahan yihiin in xuquuq la siiyo, Intaas oo Mudane mushahar lama wada siin karo, laakiinse waa in loo dhigo qaabkaan barigii hore u dhigney oo ahayd, *in la ambabixiyo*, markaa taasna waa in Gudi loo saaro oo la soo sameeyo qaabkii Mudanayaasha loo ambabixin lahaa.

Caruurta, inaga sharcigeena Islaamka qaangaadhku waa 15 jir, markaa wax 18 jir ah ma jirto, waan ka baxey, markaa waa in 15 jirka sharcigu islamku ogol yahay laga dhigaa.

**19. Md. Maxamuud Jaamac Cilmi:-** shir-gudoonka iyo mudanayashu way salaaman yihiin, Gudoomiye Xeerka Cinwaankiisu waa Xeerka Maamuusku Madaxweynaha iyo M/weyne ku-xigeenka, Xeerka Maamuusku waa inuu noqdaa mid dastuuriya oo joogta ah, oo aanu noqon kan oo kale ee wuu waafaqsanaado dastuurka, waa in laga dhigaa Xeerka Maamuuska Madaxweynayaasha iyo M/weynayaal ku-xigeenada oo jamac laga dhigaa.

**Qodobka 5aad F/4aad**, Farqadan waxa ku qoran iyo xuquuqda dastuurku siiyay qofka isma waafaqsana, waa inaan qofka xuquuqdiisa dastuuriga ah lagu xadidin mushahar yar oo la siinayo, waa in Dastuurka la waafajiyo, Golihii Guurtidana already wuu ku jiraa oo xubin buu ka yahay.

**Qodobka 6aad** wuxuu leeyahay markey ka degaan xilka ayaa loo qorayaa **Qodobka 11aad** wuxu leeyahay marka uu hirgalo oo madaxweynu saxiixo ayaa loo qorayaa, Markaa labadaa Qodob khalad baa ku jiree ha la iswaafajiyo.

Aqalada iyo wax tarka kale, somalidu waxay tiraahdaa amaano kugu raagtey inaad leedahaad mooda, ha la iska siiyo, waayo haduu dhinto dhaxal buu noqonayaa oo inankisaa iska qaadanaya, arrinka waxaan soo jeedin lahaa in lagu wareejiyo oo la siiyo, Hadii kale waa in Xeerka

lagu qoraa "***lama iibin karo, Lama wareejin karo, lama kareyn karo, lamana dhaxli karo***" hadii kale waxaa imaneysa in la isku qabsado, markaa waa in sharci laga dhigaa, halkan waxaa ka dhiman waa arrin sharciyadeed in looyarku sharci ku soo fadhiisiyo, waayo hadhow muran baa ka imanayee.

Arrinta Golayaasha, wax aad xaq u leedahay cid lama amaahiyo, asxaabteyda halkan ka hadlaya sharci aan sameyo ana sameysan maayo lagaa aqbali maayo, hadaadan naftaada u hadalna cidkale u hadli meyso, waa in adhoc committee loo saaro waxba qaadan meyso oo xeerkiina waa diyaar Gudidda joogtadaana haysa, Markaa inta Gudi loo saaro hala soo dhameystiro.

20. **Md. Dr. Cali Yuusuf:-** saddex qodob oo yar baan doonayaa inaan kubiiriyo oo ah:-

- Magaca Xeerka in la yidhaahdo ***"Xeerka Maamuuska iyo Gunada Madaxweynaha iyo M/weyne ku-xigeenka"*** waayo lacag baa ku jirta meesha.
- Waxa xeerka loo sameyay Madaxweynaha iyo ku-xigeenka sharaf weyn bay mudan yihiin, Kolkaa Qaranka ceeb ayay ku noqoneysaa biil aan ku filneyn markay xilka ka degaan iney la siiyo, mushaharka ay Guurtida laga siiyo inaaney ku filnaaneyn sidaasaa mid kale loogu darey, ***markaa waxaan soo jeedin lahaa hadii ay wadankaba ka guuraan eleyn Guneynu u sameyne, inuu Gunada dibadda ku qaadan karo, laakiin Gunada Guurtida laga jaro oo laga guuro.***
- Guriga ay ku jiraan M iyo M/weyne ku-xigeenka kolkey geeriyoodaan, waxaa ku taal caruurtooda inanka ugu yar uu ka qaangaadho ay ku sii jiraan. ***Anigu sidaan u soo jeedinayo "waa in la siiyo mudo 2 sano***" ha la siiyona odhan maayo, waayo Madaxweynaha Caruurtiisu way badnaan karaan oo hadhow way isku qabsanayaan.

| | |
|---|---|
| **Cawad Cali Maxamed** | **C/risaaq Siciid Ayaanle** |
| **Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSI** |
| ------------------------------------------------ | ---------------------------------------- |